Ugama tegin gadaashayda fitno Ragga uga daran Dumarka

Usaama Binu Seyd Allaha ka raali ahaado isaga iyo Aabihiyee, waxaa laga wariyey in Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee uu yiri: Ugama tegin gadaashayda fitno Ragga uga daran Dumarka".

[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay inuusan gadaashiisa uga tegin Ragga itaxaan iyo ibtilo uga daran Dumarka, haday ehelkiisa tahay waxaa dhici kara inuu ku raaco waxay Sharciga ku khilaaftay, haday ajnabi ka tahayna inay is dhex galaan oo uu la khaali noqdo ayaa fasaad uga imaan karaa.

http://sunnah.global/hadeeth/so/show/5830